

Shuruudaha Ku Xiran

Barnaamijka Dugsiyada ee Waaxda Caafimaadka ee Minneapolis waxa ay diiwaanka talaalka ku dareysaa diiwaankaaga caafimaadka (diiwaanka caafimaadka ee ilmaha). Macluumaadka halkan ku xusan waa mid loogu talo galay in lagula socdo diiwaankaaga caafimaadka ee talaalka si looga hortago cudurada. Haddii lagu weydiisto macluumaadka shaqsiga ah oo aadan bixin, waxaa suurogal ah in talaalka lagu diido. Macluumaadkaas waa mid qarsoodi ah oo lalama wadaagayo cid kale marka laga reebo Waaxda Caafimaadka ee Minnesota; shaqaalaha caafimaadka ee xirfadlayaasha ah sida dhakhaatiirta, kalkaaliyayaasha caafimaadka, ceymiska caafimaadka, barnaamijka dugsiyada ee caruurta, hay'adaha degmada ee caafimaadka dadweynaha, hay'adaha community action, ama shaqaalaha goobaha caafimaadka sida isbitaalada si ay u ogaadaan talaalada aad qaadatay ama kuu siiyaan talaalada kale ee aad u baahantahay mustaqbalka ee dugsiyada ama kuliyadaha. Diiwaanka talaalka caafimaadka waxaa loo gudbinayaa Shabakadda Macluumaadka Talaalka ee Minnesota (MIIC) diiwaanka gobolka oo dhan. Haddii aad dooneyso in aan macluumaadkaaga dooneyn in lagu daro diiwaanka fadlan noo sheeg.

Qaadashada Talaalka

Qaar badan oo talaalka ka mid ah waxaa la qaataa laba (2), sadex (3), afar (4), ama shan (5) jeer si loo dhameystiro. Kuwaas waxaa ka mid ah **Td** (tetanus/diphtheria); **Tdap** (tetanus, diphtheria, acellular pertussis); **IPV** (injectable polio vaccine); **MMR** (xiiqdheerta, jadeecada, kojiyaha); **Hep B** (talaalka hepatitis B); **MCV4** (talaalka meningococcal conjugate); **HPV** (human papillomavirus); **Hep A** (talaalka hepatitis A); **MenB** (talaalka meningococcal group B); **COVID** (talaalka cudurka coronavirus), **Varicella** (busbuska); **MMRV** (xiiqdheerta, jadeecada, kojiyaha, busbuska); **DTaP** (diphtheria, tetanus, acellular pertussis).

Talaalka soo socda waxaa ku talinaya dhakhaatiirta caafimaadka:

Hep A: 1 2 **Hep B:** 1 2 3 **HPV:** 1 2 3 **Infuliweensada:** 1 **IPV:** 1 2 3 4
MCV4: 1 2 **MMR:** 1 2 **Td:** 1 2 3 B **Tdap:** 1 2 3 B **Men B:** 1 2
Varicella: 1 2 **COVID:** 1 **MMRV:** 1 2 **DTaP:** 1 2 3 4 5

Cadeyn marka aad hoos saxiixdo, waxa aad ogolaatay waxyaabaha soo socda:

Waxaa la i siiyey nuqul ka mid ah oo aan akhriyey ama la ii sharxay macluumaadka ku jira ee la xiriira talaalka (warqadda warbixinta) ee ku saabsan cudurada iyo talaalka kor lagu xusay.

Waxa aan fursad u helay in aan weydiyo su'aalo kuwaas oo aan jawaabtooda ku qancay.

Waxa aan fahmay faa'iidada iyo khatarta talaalka ee kor ku xusan waxa aanan codsanayaa talaalka kor ku xusan la i siiyo ama la siiyo qofka hoos ku xusan.

Waxaa intaas dheer, haddii qofka ku xusan yahay ilmo aan qaan gaarin, waxa aan cadeynayaa in aan ahay waalidka, wakiilka sharci ahaan, ama mas'uulka ilmaha oo aan bixin karo ogolaashahan.

***Foomka oo aad saxiixday ku soo celi Xarunta Caafimaadka ee Dugsiga**

Magaca iyo # ardayga fadlan si cad u qor

Saxiixa Ardayga haddii uu ka weyn yahay 18 sano

Taariikh

Magaca sadexan ee Waalidka/Mas'uulka

Telefoon lambarka

Saxiixa Waalidka/Mas'uulka

Taariikh

Si aad u hesho macluumaadka talaalka loo baahan yahay fadlan akhri Warqadda Macluumaadka Talaalka (VIS):

https://www.immunize.org/vis/vis_somali.asp

Ama haddii aad dooneyso in nuqul lagu soo diro sax ku calaamadee halkan

Dib U Eegista Waaxyaabaha Ka Dhalan Kara Talaalka

Xanuunka Febrile/Caabuq jira/Qandho > 101 Haa Maya hadda ka hor talaalka maku xanuunsatay? Haa Maya

IPV

Bukaaku uur ayey leedahay? Haa Maya Xasaasiyad maka qaadaa neomycin, streptomycin, polymyxin B? Haa Maya

MMR & Varicella

Xasaasi ku ah gelatin? Haa Maya Xasaasiyad maka qaadaa neomycin? Haa Maya

Uurey? Haa Maya Waa in aadan iminka uur la heyn oo aadan uur qaadin 4 todobaad. Haddii aad sameeyso galmood, isticmaal habab looga horago uurka.

Difaaca jirka ee bukaanka waa mid la shiiqiyey (Immunosuppression)? Haa Maya

Hep B

Xasaasiyad maka qaadaa qamiirka rootiga? Haa Maya

Infuliweensada

Kani waa talaalkii iigu horeeyey ee hargabka Haa Maya

Xasaasiyad maka qaadaa ukunta, digaaga ku jiro, waxyaabaha lagu daro cuntada ee cimrigooda dheereeya, gentamicin, arginine, ama waxyaabaha laga sameeyo talaalka hargabka? Haa Maya

Maanta qandho ayaa i heysa. Haa Maya Taariikhdiis hore ee calaamadaha Guillain-Barre? Haa Maya

Waxa aan qaataa daawada dhiiga khafiifisa? Haa Maya

Magaca: _____

TDaP, DTaP

Xasaasiyada maka qaadaa Latex? Haa Maya

Horay ma kuugu dhacay epilepsy/qalal ama dhibaato la xiriirta habdhiska dareenwadka? Haa Maya

Horay ma isugu argtay calaamadaha Guillain-Barre? Haa Maya